

**Xeerka 16ka Luulyo 1958, lamba. 3 Diw. (AFIS)**

**Dhismaha koox madaxbannaan oo daraawiish talyaani oo toos u hoos tagta “Maamulha Soomaaliya”.**

### **MAAMULAHA**

Markuu arkay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyaada Talyaaniga, ee taariikh 9 Disember 1952, lamba. 2357;

Markuu arkay Xeerka Maamula, 11 lamba. 18, oo taariikh 1da gennaayo 1956 oo la xiriira dhisidda Ciidamada Boliiska, ee Soomaaliya;

Markuu Aqoonsaday fursada ah in Maamulka Wasaayada Talyaaniga, ee Soomaaliya, lagu dhex dhiso Urur madaxbannaan, ee Karabiniyeeriga Talyaaniga oo toos u hoos imaanaya Maamulaha oo u xilsaaran in uu kaalmo farsamo u fidiyo Taliska Ciidanka Boliiska;

Markuu Dhegeystay Guddiga Maamulka;

### **WUXUU XEERAYAA:**

#### **Qod. 1**

Taariikhdu marka ay tahay 20ka Luulyo 1958, Ururka Taliska Karabiniyeeriga, ee Ciidanka boliiska, Soomaaliya, waxa uu qaadanayaa magaca “Ururka Madaxabannaan, ee Karabiniyeeriga Talyaaniga oo ku sugan Soomaaliya.

#### **Qod. 2**

Ururka kor lagu soo sheegay waxa uu ka kooban yahay:

- Taliyaha;
- 7 Sarkaal;
- 27 saraal hoose;
- 26 Karabiniyeer.

Kharashaadka la xiriira hawlgelinta ururkaas waxaa lagu darayaa Miisaaniyadda Maamulka Wasaayada Talyaaniga, ee Soomaaliya iyo maamulka qaybtaas waxaa toos u bixinaya Taliyaha Ururka, sí waafaqsan xeerarka jira iyo sida ay qabaan amarrada uu bixiyo Maamulha Soomaaliya.

#### **Qod. 3**

Ururka Madaxabannaan, ee Karabiniyeeriga, waxa kale oo ku maamulayaa dhammaan shaqaalaha talyaaniga ah oo isugu jira militari iyo rayid kuna maamulayaa góaan maamulka oo ka soo baxa Taliska Ciidanka Boliiska lana xiriira lacagaha miisaaniyadda Maamulka Wasaayada Talyaaniga oo ay ku hoos jirto Soomaaliya.

#### **Qod. 4**

Ururka (Qaybta) Madaxabannaan, ee Karabiniyeeriga waxaa uu hoos tagaa, xagga kala-dambeynta, maamulka iyo xagga hawlgelinta, maamulaha oo. Sí uu u fuliyo waajibaadkiisa (xilkiisa) adeegsan kara Saraakiisha talyaaniga ah, ee Karabiniyeeriga, ka hawlgala Soomaaliya, oo ugu derejo sarreeya.

#### **Qod. 5**

Sarkaalka Ciidanka Karabiniyeeriga ugu derejada sarreeya ama ugu dáda ansiyaaneysan (saqada ugu hor- qortahay) kuwa ka tirsan isla Ururka (qaybta) ayaa ayaa qabanaya taliska.

#### **Qod. 6**

Taliyaha Ururka (Qaybta) Madaxabannaan ee Karabiniyeeriga Talyaaniga, ayaa shaqaalaha militariga talyaaniga, oo ka tirsan Ururkaas, ka gudanaya waajibaadka la xiriira disibiliinka (kala-

dambeynta) iyo maamul ahaaneed oo ay taliyaha siinayaan xeerarka jira.

#### **Qod. 7**

Waajibaadka la xiriira xagga disibiliinka oo ka baxsan awoodda la siiyey Taliyaha Ururka (Qaybta) waxaa toos u adeegsanaya Maamulaha.

#### **Qod. 8**

Saraakiisha ka tirsan Ururka Madaxabannaan, oo kor lagu soo sheegay, waxaa ay qaabilsan yihiin kaalmada farsamo ku jahaysan Taliyaha Ciidanka Boliiska, si waafaqsan awaamirta uu Maamuluhu joogtada u bixinaya maalin kasta.

#### **Qod. 9**

Xagga fulinta waajibaadkooda (howlahooda) saraakiishu waxa ay adeegsanayaa saraakiil-xigeenka iyo militariga ciidan, kuwaas oo ah kuwo ah khuburo takhasus gaar ah u kala leh hawlaha.

#### **Qod. 10**

Dhammaan wixii ah saanad-hub, qalabeyn, xero-dejin, iyo gaadiid rar caadiya – oo ilaa taariikhda xeerkan – oo loo qoondeeyey Ururka Taliska Karabiniyeeriga, ee Ciidamada Boliiska, waxaa lagu wareejinayaa oo yeelanaya Ururka Madaxabannaan, ee Karabiniyeeriga Talyaaniga ilaa inta la baabinayo oo markaas loo meel-dhigo Taliska Ciidanka Boliiska.

Dhismooyinka iyo degaannada oo ilaa hadda ay deggan yihiin qaybo ama militari Xoogga (seerjitada) Talyaaniga waxaa sii isticmaalaya shaqaalaha Ururka Madaxabannaan ilaa laga baabiyo.

#### **Qod. 11**

Maamuluhu góaanno kuwiisa u adeegsanayaa xagga fulinta Xeerkan.  
Muqdisho, 16ka Luulyo 1958.

Sii-Hayaha Maamulaha

**Franca**

Waa arkay waana Diiwangeliyey –  
Diiw. lamba. 26, xaashi lamba. 69.  
Muqdisho, 16 Luulyo 1958.  
Hantidhowraha: **Spadaro.**